

Oktoobar 2021

Dhammaanteen marmarka qaarkood waan cabsoonaa...

Marka sanad dugsiyeedku dhammaado oo shaqooyinkii joogtada ahaana dib loo bilaabo, si isku mid ah ayay caruurta iyo dadka waaweyni ula kulmi karaan dareen cabsiyeed. Cabsidu waxay noqon kartaa dareen caawimo leh kaas oo amaankeena ilaalinaaya, laakiin waxay u dhacdaa qaab soo noq noqota ama qaab si aad u xoog badan – taasi waxay noqon kartaa calaamad aynu u baahanay si aan caawimo u helo. bishan, sharfida Halloween, waxaynu quusi doonaa dareenka cabsida, sida jidhkeenu si toosa uga jawaabo, iyo qaababka loo maamumo ama loo yareeyo dareenka.



Waa maxay Cabsiyi?

Cabsidu waa dareen aan haboonayn taas oo badankeenu la kulano markaan wajahno nooc khatar ah. Cabsidu waa sida digniinta dabka ee jidhkeena. Waxay kaa caawin kartaa inaad ka baxdo oo aad ka digtoonaato khatar kugusoo socota (dab). Si kastaba ha ahaatee, sidoo kale waxay noqon kartaa mid aan ku caawinayn waxaanay inagu khiyaani kartaa fikir ah inay jirto khatar (Qiiq ayaa jira sababtoo ah waxaad gubtay Pizza dii). Marka digniintaa dabku maskaxdeena soo gasho xoog bay u boodaa ama waxay kujawaabtaa inaanay khatar jirin, taa macnaheedu waa in qof uu la kulmaayo nooc ka mid ah welwelka, ama la kulmayaa dawakhaad mar uun noloshooda. Waa caawimo inaad awoodo inaad aqoonsato calaamadaha, shaqsiga, ama naftaada, la kulmaaya cabsi.

Dagaal, Orod, ama Dejin: Ka jawaabida tooska ah ee khatarta

Markaan filanayno khatar, jidhkeenu wuxuu bilaabaa qaab uu ku daminaayo hababka aanaynu u baahnayn inay bad baadaan waxaanu daarnaa kuwa aan rabno. Jawaab celintan waxaa loo yaqaan “Dagaal, Orod ama Dejin”. Waxaa jira jawaab celinno kuwaas oo si toosa ah aan u xakamayn karin, waxaanay dhacaan markaan filanayno khatar ha noqoto mid jirto ama yaanay jirin. Jawaab celintani ma dhacayso uun waqtiga dhaw, sida marka xaaladdaha adag lagu jiro, laakiin waxaan aragnaa tan jawaab dheer dadka kuwooda la kulmay jugaha waaweyn. Xagan hoose waxaa ku qoranshax jawaab celinaha in la Dagaalamo, La ordo ama La dejiyo:

- Garaaca wadnahaagu wuu kordhi karaa isagoo dhiiga ku tuuraya si xooga kooxaha murqaha waaweyn waanu yaraan karaa marka la dejiyo, maadaama jidhkaagu aanu u baahnayn tamartaa.
- Gacmaha iyo luguhu way qaboobi karaan maadaama dhiigii lagu tuuray meelihii aadka muhiimka u ahaa. Tani waxay keentaa badanaa inay dadku u ekaadaan cadaan.
- Indhahaagu way waaweynaanayaan si ay u helaan nuur dheeraad ah awoodaada araguna way fiicanaysaa si aad si fiican wax ugu aragtid.
- Dhiigaagu wuu adkaanayaa si wuu dhaawac isugu diyaariyo.
- Nidaamkaaga dheefshiidku wuu xidhmayaa maadaama jidhkaagu aanu u baahnayn shaqadan si uu uga baxsado khatarta. Tani waa waxa sababa lallabada/matagga ama dhididka naftaada inta lagu jiro xaaladdan cidhiidhiga ah.

*Sanadadan dambe oo dhan, dadka qaar waxay sheegayeen nooc jawaab celin ah oo afraad oo loo yaqaan “Fawn.” Tan waxaa ka mid ah dabeecad sida dadka-raaligeiya ama horumariya doonisaha dadka kale.

Daaqadda Dulqaadka

Tusaalahani wuxuu ina tusayaa nooc kale oo loo arko jawaab celinta cabsida iyo sida debeda looga arki karo iyadoo la isticmaalayo “Daaqadda Dulqaadka”. Figradani waxay dhigaysaa jawaab celinihii cabsida mid joogto ah oo ku bilaabmayaa culays badan ilaa dhammaad. “Daaqada Dulqaadku” waxay kujirtaa dhexda. Tani waa marka qof uu cidhiidhi kujiri karo laakiin uu weli awoodo inuu isticmaalo xirfadaha la qabsashada, ama marka ay sameeyeen shaqo muhiim ah si ay u bilaabaan inay ka bogsadaan jugtii.

Daaqadda Dulqaadka

<p>OROD/DAGAAL</p> <p>Inta lagu jiro xaaladda caadiska adag waxaad ka dhacaanayaa dagaalada ciidanka oo waxaadna u gudbaysaa xaalad adag dagaalamaysa ama ordaysa.</p> <p>Walaaca walwala cabsida cadhada/xanaaga gardarada</p>	<p>CULAYS BADAN</p>
<p>DAAQADDA DULQAADKA</p> <p>Marka aad xakamayn karto una qaabayn karto dareenkaaga si caafimaad qabta markaas oo aad awoodaysi inaad shaqayso oo barwaaqaysato.</p> <p>Dulqaadkaaga waxaad ku kordhin kartaa xirfadaha la qabsiga.</p> <p>Ammaan Awood Degenaan Is-ogaansho Xasuu Hawl Isdejin Ku-xidnaan</p>	<p>XAKAYN KARTO</p>
<p>DEJIN</p> <p>Inta lagu jiro xaaladda caadiska adag, si buuxda ayaad xidhayaa una joojinaysaa jidh ahaan/dareen ahaanba.</p> <p>Murugo Daal Kurbo Keli-ahaansho Fogaansho habsasho Jiho la'aan</p>	<p>XIDHIIDHI</p>

@BlessingManifesting



Tusaalayaan Xayawaan

Markaan la shaqaynayno caruurta, qaab kale oo aan u tusi karo jawaab celinaha Dagaal, Orod ama Dejin waa inagoo is barbar dhigna xayawaanka. Inaad la shaqayso canugaaga ama arday si aad uga fikirto wax ku saabsan xayawaanada kuwaas oo isticmaalaya jawaab celintan si ay u bad baadaan una barwaaqoobaan nolosha maalinlaha ah. Ka fikir wax ku saabsan bakayle ka jawaab celinaaya aragtida uu ku arkay adigu daaradaada ama sida shabeel uu uga falceliyo xayawaan weyn oo meeshiisa ugu yimid. Baadh sida jawaab celinta xayawaanku ay u bedeli karto haddii ay ammaan dareemaayaan marka la barbar dhigo markay khatar dareemaayaan ama cidhiidhi kujiraan.